



Ra'iisal Wasaraha Qaaliga ah,

WEYDIINTA UK ee COVID-19 - TIXRAACA SHURUUDAHA TALLOOYINKA

Marka aad aniga ii magacawday, waxaad ii fiirtay inaan dad weynaha kala tashado tixraaca shuruudaha qabyada ah waxaad ii siisay kuwaan 10 Maarso. 11 Maarso waxaan bilawnay geedi socodkaas Aniga iyo kooxdeyda waxaana hadda dhammeystirnay falanqaynteen. Waxaan ku soo lifaaqay tallooyinkeeyga Tixraaca Shuruudaha, kuwaas oo wax looga beddelay falaqaynta Weydiinta ee jawaabaha la tashadka.

In ka badan 20,000 oo qof iyo ururo ayaa ka jawaabay la tashadka. Intii lagu jiray la tashadka afart-toddobaadka, waxaan kulumo kula qaatay in ka badan 150 qof oo ah qoysaska laga dhintay iyo ururada matalaya qeybaha kala duwan ee magaalooyinka UK oo dhan. Waxaan k maqlay gacantii ugu horeysay sida ay muhiim ugu tahay weydiinta qotoda dheer ee UK ay wax ugu qabanayso cudurka safmarka ah Korona fayras waa. Habkaan ayaa siisay warbixin muhiim ah iyo falaqaynta waxtarka ah ee Tixraaca Shuruudaha qaybyada ah. Waxay muujisay rabitaanka dadka ee ah inay ka qeyb qaataan Weydiinta iyo rabitaankooda ah inay igala shaqeyaan in la hubiyo in la barto casharada muhiimka ah.

La tashadka ayaa sheegtay meelaha kor laga hagaajin karo Tixraaca Shuruudaha. Waxaan dhagaystay doodo soo jiidasho oo xooga lagu saarayo carruurta iyo dadka dhalinyarada, caafimaadka dhimirka, iyo fayd qabka dadka UK iyo wada shaqeynta u dhaxeysa gobolka, dowladd goboleedka, iyo iskaa wax u qabsashada iyo qeybta bulshada. Sidaa darteed waxaan ku weydiisanaya inaad ballariso Tixraaca Shuruudaha in lagu soo daro arrimahan.

Saameynta aan sinayn ee cudurka safmarka ah ayaa wuxuu ahaa mowduuc si xoogan uga soo baxay jawaabaha la tashadka. Waxaan sidaa darteed ku talinaya Tixraaca Shuruudaha in dib loo habeeyo si loo furinta hore looga dhigo sinaan la'aanta surtagalka ah si baaritanka saameeynta sinnan la'aanta ee cudurka safmarka ah ugu shaqeyo Weydiinta oo dhan. Tixgelintan muhiimka ah waxay hubin doontaa Weydiinta in lagu soo daro qaabkeeda.

Ugu dambayntii, waxaan soo jeedinaya dhowrka isbeddel oo kale si afayno xoog saarideena. Isbeddelan waxay la xiriiraan dhowr meel oo muhiim ah, oo ay ku jirto daryeelka gurig, xakameynta joogtada, taageerada dhibanayaasha ee xagadub qoyska, iyo xiriirka koowaad ee NHS, oo ay ku jirto 111 iyo adeegyada 999.

Waxaan rumeysanahay isbeddelan inay u hubiyan doonaan Weydiintu si wanaagsan u buuxin karto ujeedadeedu si loo baaro u diyaargarowga iyo ka jawaabista cudurka safmarka ah ee Covid-19, iyo si loo barato casharada loogu talagalay mustaqbalka.

Waxaan rajaynaya inaad si buuxd u aqbali doonto tallooyinkeeyga. Haddii sidan la sameeyo waxay aqoonsan doonaa tallooyinka muhiimka ah ay ku qaaraameen dhammaan dadka ka qeyb ka taahay la tashadka Weydiinta dadweynaha iyo haddii sidaa degdega ah la sameeyo waxay xaqiijin doonaa inay Weydiintu ku bilaabi karto shaqadeeda si rasmi ah iyada oo dib u dhicin.

Daacadnimadaada,

H/E Hallett

The Rt Hon Baroness Hallett DBE PC

Enc. Wax ka beddelista Tixraaca Shuruudaha ee la soo jeediyey